# Halkani waa gurigeennii [Ko tō tātou kāinga tēnei]

*Waxaa la soo koobay warbixintii Gudidda Boqortooyada xog raadintii weerarkii argagixisada ahaa ee lagu qaaday labada masjid ee Chrustchurch 15kii March 2019*

[SOMALI]

ROYAL COMMISSION OF INQUIRY
INTO THE TERRORIST ATTACK
ON CHRISTCHURCH MOSQUES
ON 15 MARCH 2019

TE KŌMIHANA UIUI A TE WHAKAEKE
KAIWHAKATUMA I NGĀ WHARE
KŌRANA O ŌTAUTAHI I TE
15 O POUTŪ-TE-RANGI 2019

26 November 2020

*Halkani waa gurigeennii*
*[Ko tō tātou kāinga tēnei]*

*Waxaa la soo koobay warbixintii Gudidda Boqortooyada xog raadintii weerarkii argagixisada ahaa ee lagu qaaday labada masjid ee Chrustchurch 15kii March 2019*

*Waxaa la daabacay: 26 November 2020*


*ISBN 978-0-473-54879-7 (PDF)*

*ISBN 978-0-473-55300-5 (Paperback)*

*© Copyright 2020*

*Warqaddan rasmiga ah waxa laga helayaa halkan: www.christchurchattack.royalcommission.nz*

*Warqad la hubiyay aan lahay Acid lana baabiin Karin.*



# Halkani waa gurigaagii waxaanay ahayd inaad nabadgelyo

*Odhaahdan waxaa si naxariis leh ugu deeqay farshaxan Ruby Jones.*
*Gudida Boqortooyada waxay si qoto dheer u ammaanaysaa hibadiisa iyo naxariistiisa Ruby.*

## Waxii la garwaaqsaday

Gudida Boqortooyada waxay garwaaqsatay in ay jiraan 51 Naftii hure (Shahiid). Waxay ahaayeen xudunta xug raadintayada.

Waxaanu filaynaa in sheekooyinka 51ka shahiid ay jiraan oo ay sheekooyinkoodu guubaabiyaan inaga iyo da'aha inaga dambeeyaba.

Gudida Boqortooyada waxa kale oo ay garwaaqsantahay kuwii badnaa ee ka badbaaday iyo kuwii goobjoogga u ahaa.

Waxaanu filaynaa in ay qoysaskii 51ka shahiid, iyo kuwii ka badbaaday iyo kuwii goobjoogga u ahaa weerarkii argagaxisada ahaa iyo qoysaskoodii (whanau) ku noolaadaan nolol amaan ah.

### Kia whakatōmuri te haere whakamua

*Waxaan dib ugu noqdaa waqtiga soo socda iyadoo indhahaygu aad ugu eegayaan waqtigii tegay.*

Maahmaadani waxay tilmaamaysaa sida dadka Maori-ga ahi u arkaan aayaha waqtiga, halka  waqtigii tegay, ka jooga iyo ka soo socdaa ay isku wada xidhan yihiin. Habkan waqtiga loo sawiranayaa kama tegaayo waqtigii la soo dhaafay; waxaa jirta in waqtigii tegey loo soo xambaaran waqtiga soo socda.

Abdelfattah **Qasem**

Ahmed Gamal Eldin Mohamed **Abdel Ghany**

Dr Amjad Kasem **Hamid**

Arif Mohamedali **Vohra**

Ashraf **El-Moursy Ragheb**

Farhaj **Ahsan**

Haji Ashraf **Ali**

Haji Mohemmed Daoud **Nabi**

Hamza **Alhaj Mustafa**

Husna **Ahmed**

Hussein Mohamed Khalil **Moustafa**

Kamel (Moh'd Kamal) Kamel **Darwish**

Khaled **Alhaj Mustafa**

Linda Susan **Armstrong**

Mohamad Moosid **Mohamedhosen**

Mohammed Omar **Faruk**

Mounir **Soliman**

Dr Muhammad Abdus **Samad**

Muhammad Suhail **Shahid**

Musa Vali Suleman **Patel**

Osama Adnan Youssef **Abukwaik**

Ramiz Arifbhai **Vora**

Sheikh Muse Nur **Awale**

Syed Jahandad **Ali**

Tariq Rashid **Omar**

Zekeriya **Tuyan**

Abdukadir **Elmi**

Ali Mahmoud **Elmadani**

Ansi **Karippakulam Alibava**

Ashraf **Ali Razak**

Atta Mohammad Ata **Elayyan**

Ghulam **Hussain**

Haji Matiullah **Safi**

Hajji Maheboob Allahlakhar **Khokhar**

Dr Haroon **Mahmood**

Hussein Hazim **Al-Umari**

Junaid **Ismail**

Karam **Bibi**

Lilik Abdul **Hamid**

MD Mojammel **Hoq**

Mohammed Imran **Khan**

Mohsen Mohammed **Al-Harbi**

Mucaad Aden **Ibrahim**

Muhammad Haziq **Bin Mohd Tarmizi**

Muhammad Zeshan **Raza**

Naeem **Rashid**

Ozair **Kadir**

Sayyad Ahmad **Milne**

Syed Areeb **Ahmed**

Talha **Naeem**

Zakaria **Bhuiya**

This is our home

Ko hotau 'api eni

这是我们的家

Dies ist unser Zuhause

ےہ رھگ ارامہ ی

Bu bizim evimiz

यह हमारा घर है

## Ko tō tātou kāinga tēnei

這是我們的家

এটাই আমাদরে বাড়ি

Nous sommes chez nous ici

يد روک ږنومز اد

Kani waa guriga naga

O le mātou 'āiga lenei

یہ ہمارا گھر ہے



**Calaamadayadu waxa dhiirigelinayaan dhabar adayga iyo Aotearoa-da marwalba jira ee ah calaamadda New Zealand, caleenta fern-ka, the koru.**

Furfuridda caleemaha geedka fern-ka oo ah astaan nabadeed, deganaansho, koritaan, isbeddel togan iyo soo jeed. Dhinacan nabadda waxay kaloo tahay mid laga dhaxlay diinta nool ee Islaamka.

Waxaanu isbarbar dhignaa taonga-da iyo geediga reer New Zealand ay ku socdaan si ay u noqdaan dad nabad ah iyo bulsho aad isu haysata.

Naqshadda fern-ka oo ay la socdaan todoba kooxood oo ah todoba caleemood oo la furfuray waxa kale oo ay ina baraysaa inay 15kii March 2019kii ahayd, sida laga soo xigtay taariikhda dayaxa la socota ee Islaamka, 7dii Rajab1440kii ay tahay maalita 7aad ee bisha 7aad ee Islaamka.

# Hordhac



*Salaamu Caleykum iyo tēnā koutou.*

1 Waxaanu ku bilaabaynaa garwaaqsiga qoysaskii 51kii shahiid, badbaadeyaashii iyo goobjoogeyaashii weerarkii argagixisada ahaa ee 15kii March 2019kii iyo qoysaskoodii ay noloshoodii isbedeshay intay noolyihiin. Kuwii lagu weeraray labada Masaajid waxay ahaayeen dad reer New Zealand ah oo isugu yimi inay nabad ku wada tukadaan. Qofaka argagixisada ahaa waxa uu dilay 51 qof waxaanuu isku dayay inuu dilo 40 qof oo kale. Falalkiisa axmaqnimada ahi waxay ahaayeen wax laga xumaado oo aan la fahmikarin.

2 Weerarka argagixisada ah waxa waday fikrad xagjir fog oo garabka midig ah cuqdadna ka qaba Islaamka. Ujeedadiisu waxay ahayd in laga kiciyo cadaawad iyo isnacayb New Zealand dhexdeeda. Ujeedadaasi guuldaraysatay. Maalmihii, todobaadyadii iyo bilihii ka dambeeyay, reer New Zealand way midoobeen waxaanay ku urureen kuwii ay saamaysay dibaatadu, waxaanay diideen takoorka, xagjirnimada iyo rebshadaha xagjirka. Waxa jiray waqti aynu wadaninimo kamuujinay qiimaha aynu wadaagno, nolosheena wada jirta iyo macnaha ay leedahay in lagu noolaado New Zealand.

3 Wadanku waxa uu u baahanyahay inuu ogaado wixii dhacay, iyo sababta, iyo waxay tahay inaynu qabano si aynu u yarayno khatarta weerarro dhaca waqtiga soo socda. Gudidan Xogbaadhka ee Boqortooyada waa la sameeyay. Waxay noo ahayd Sharaf iyo qaderin inaanu noqono xubnihii ka shaqaynayay.

4 Xuddunta xog baadhistayadu waxay ahayd kuwii dhintay, qoysaskii 51kii shahiid, badbaadeyaashii iyo goobjoogryaashii weerarkii argagixisada ahaa iyo qoysaskoodii. Waxaanu doonaynay inaanu dhegeysano oo ula dhaqanno si dhaqnahaan haboon.

5 Waxa khushuuc na geliyay kuwii sida naxariista leh noogu soo dhaweeyay guryahooda. Dadku waxay wadaageen tiiraanyadoodii iyo urugadii iyo weliba jacaylkii ay u hayeen New Zealand iyo ducadoodii inay bulshooyinka New Zealand oo dhan xidhiidh (xiriir) wanaagsani dhex maro. Dadkii noloshooda xagga kale laga rogay ayaa sikastaba ha noqotee karikaray inay mustaqbalka eegaan oo wax ka caawiyaan New Zealand.

6 Aad ayaanu u baadhnay qofkii qorsheeyay ee fuliyay weerarkii argagixisada ahaa. Su'aalo adag ayaanu ka waydiinay Hey'adaha qaybaha Bulshada, gaarahaan kuwii shaqada ka dhigtay inay ka ilaaliyaan New Zealand weerarradan oo kale.

7 Waxaanu la kulanay New Zealand kala duwan iyo khabiirro calami ah oo aanu kawada hadlaynay waxyaabo kala duwan sida ururinta siraha iyo isku xidhka bulshada. Boqolaal qof ayaa nala kumay, wax noo soo qoray, cadday nasiiyay oo aanu waraysanay. In ka badan 1,100 qof ayaa war noo soo gudbiyay.

8 Waanu umahadnaqaynaa qof kasta oo noola shaqeeyay si weji furan oo daacada. Waxaanu dareenay ujeedada dhabta ah ee qalbiga ka timi ay nooga caawinayeen baadhista si ay reer New Zealand oo dhammi uga faa'iidaystaan mustaqbalka. Waxa arrintan si gaara uga qaybgalay xubno kamida Ururka Raadraaca Bulshada Muslimka kuwaasoo aragtidooda dheeri aad uga qaybqaadatay warbixintayada. Sidoo kale, waxa kale aanu umahadnaqaynaa Bulshada Caddaaladda (Just Community) iyo Mar Dariiqaaga Aaminaadda (Navigate Your Way Trust), ururadii naga caawiyay inaanu la shaqayno qoysaskii 51kii shahiid, badbaadeyaashii iyo goobjoogeyaashii weerarkii argagixisada ahaa iyo qoysaskoodii.

9 Waxaanu u mahadnaqaynaa khabiirada caalamiga ah iyo Sirdoonka iyo Hy'adaha Ammaanka ee Australia, Norway, United Kingdom iyo United States oo waqtigooda iyo khibradooda qiimaha badan noo siiyay si hagarla'aan ah. Waxaanu u haynaa mahadnaq gaara Lord Hoga-Howe QPM iyo John Mckinnon CNZM QSO oo nasiiyay khabiirnimo iyo aragti dheer oo madax banaan kuwaasoo muhiim u ahaa baadhistayada iyo warbixinta.

10 Ugu dambayn, waxaanu mahadnaq u jeedinaynaa xoghayntii, la taliyeyaashii caawinaayay iyo Gudida Boqortooyada oo nasiiyay aragtiyahoodii kala duwanaa, farshaxan -nimadoodii iyo khibradoodii si aanu dul ugu yeelano shaqadayada, hubinana hawl gudasho adag.

11 Waxaanu warbixintan ku soo gudbinay talo soo jeedino aad u balaadhan oo fahfaahsan. Waxay yihiin aasaaska New Zealand ammaan ah oo isdhexgal leh.

**Hon Sir William Young KNZM**
Chair

**Jacqui Caine**
Member

# Waxyaabaha ku jira


| | |
|---|---|
| **Waxii la garwaaqsaday** | 2 |
| **Hordhac** | 7 |
| **Fulintu waxay soo ururiyeen** | 10 |
| **Natiijooyinkii oo laysukeenay** | 20 |
| **Talooyinka oo lasoo koobay** | 23 |
| **Dammaadka Qoraalka** | 37 |

# Fulintu waxay soo ururiyeen

1 Toban maalmood kadib weerarkii burburka lahaa ee 15kii March 2019kii, dawladdu waxay magacawday Gudida Boqortooyada ee Xog Baadhista, oo caamahaan loo egmaday arrintii ugu halisaysnayd bulshadana muhiimka u ahayd, waxaana loo sameeyay si ay u baadhaan kana soo warbixiyaan wixii dhacay.

2 Waxaa fuliyay weerarkii argagixisada ahaa Brenton Harrison Tarrant, oo hadda lagu xukumay argagixisonimo, dilka 51 qof iyo isku day dil 40 qof. Hadda waxa uu ku jiraa xukun ah xabsi daayin aan saamaxaad lahayn. Ninkaa waxaanu ugu yeedhidoonaa inta warbixintayada "Qofkii" ama (the individual) magaciisu kama muuqandoono halkan markale halkan.

3 Shuruudaha iyo Tixraaca ay Dawladu noo digtay ayay noogu sheegtay inaanu baadhno saddex saaxadood oo balaadhan – falkii qofka, falalkii Hey'daha Bulshada ay khusayso iyo wixii la bedelikaro ee lagaga hortegilahaa si aanay weeraro argagixiso ahi waqtiga soo socda u dhicin. Tani waxay u baahnayd cadayn dembibaadhis faahfaahsan, Waxay kaloo nagu hagtay inaanu si baahsan uga firkirro dhinackastoo nidaamyada iyo hey'adaha loo sameeyay inay ilaaliyaan oo isku xidhaan New Zealand.

4 Shuruudahayaga Tixraaca waxay naga rabeen inaanu wax ka soo saaro:

4(a) Inuu jiray wax war ah oo la soo sheegay ama ay hayeen hey'adaha Bulshada oo karaayay ama ay ahayd inuu uga digo weerarkii argagixisada ahaa, iyo hadii ay warkaa hayeen ama looga digay, sideebay hey'aduhu uga jawaabeen wixii war ahaa, hadii ay jawaabtoodu ahayd tii haboonay;

(b) Isla shaqayntii hey'adaha Bulshada ay khusayso ka dhaxaysay, marka lagudaro inay ku guuldaraysteen inay warka wadaagaan hey'adahaa ay khusaysaa;

(c) Inay hey'adaha Bulshada ay khusaysaa ku guuldaraysteen inay filaan ama qorsheeyaan inu imankaro weerar argagixiso iyadoo ay ugu wacanayd iyadaan laga fiirsan wixii lagaga hortegilahaa argagixisada ama hanjebaadda argagixisada mudnaan la siin.

(d) Inay hey'adaha Bulshad ay khusaysaa ku guuldaraysteen inay gaadhaan heerkii looga baahnaaaama inay wax ka qaldanaayeen qayb kamida ama dhammaantood; iyo

(e) wixii kale ee looga baahnaa baadhista darteed, ilaa xad ay soo diyaariyaan baadhis dhamaystiran.

5 Waanu aragnay afartii su'aalood ee uhorreeyay sidii loo soo jeediyay markii hore oo ahayd hadii ay hey'adaha Bulshada qaldanaayeen marka la eego waxyaabaha khuseeya weerarkii argagixisada ahaa.

6 Waxa kale oo lanooga baahnaa inaanu samayno soojeedin ku saabsa waqtiga soo scoda.

7 Xuddunta xog baadhistayada waxa ahaa qoysaskii 51kii shahiid, badbaadeyaashii iyo goobjoogeyaashii weerarkii argagixisada ahaa iyo qoysaskoodii. Inaanu ku xidhano Bulshada Muslimka ah ayay naga filayeen Tixraacii Shuruudahayaga, waxaanay ahayd wixii saxda ahaa inaau samayno. Sidaasaanu ku hellay aragti dheer oo qiimon badan.

8 Qoysaskii 51kii shahiid, badbaadeyaashii, goobjoogeyaashii iyo qoysaskoodii ayaa noo sheegay saamaynta joogtada ah uu weerarkii argagixisada ahaa ku reebay, taasoo ay ku jirto caqabadii in taageeradii dawladda la helo. Markaanu aad usii dhexgalay Bulshadii Muslimka ahayd waxaanu ogaanay sida ay uga calool xunyihiin qaybaha Bulshada taasoo sannado badan socotay. Bulshada Muslimka ahi si daacad ah ayay uga hadleen isirnacaybkaa, midabtakoorka iyo in lanagu tuhmo ama lanoola dhaqmo inaanu argagixiso nahay iyo iyagoo ka baqa inay bartilmaameed u noqdaan nacayb, hadal nacab leh, dembi nacayb ah iyo argagixiso.

9 Shacabkii aanu la hadaly waxay doonayeen inay arkaan isdhexgal bulsho oo intaa ka badan waxaanay noo sheegeen siday u jecelyihiin inay helaan xidhiidh bulsho oo dhaw si ay dadkoo dhammi ammaan iyo soo dhaweyn u dareemaan. Isku xidhnaanta bulshada waxay leedahay faa'iido toosa ay kamid tahay dadkoo farxad gala, nolol aayo leh oo waxkasta laga wada qayqaato. Ta muhiimka ahi waa, waxay noqonaysaa inaan dadka fikirahaan la fogeyn oo aanay noqon xagjir ama yeelan dabeecad dhib abuurta sida argagixisada.

10 Waxaa jiray werwer xoogan oo shacabka ka soo yeedhay in qofka la siiyay liisanka qoryaha. Waxa la helay hadal badan oo lasoo gudbiyay kaasoo kayimi dadka leh qoryaha oo soo jeediyay in la adkeeyo liisan bixinta, lana soo saaro talaabooyin lagu dabagelayo cidda iibsata hub badan iyo rasaasta oo ay waajib noqoto in lasoo sheego dabeecadaa werwerka leh. In badan ayaa dareensanaa in la mamnuuco qoryaha boobaha ah ee ciidamadu isticmaalaan ay tahay wax aan loo baahanayn oo lagu ciqaabayo kuwa mas'uulka ah ee hubkaa haysta, iyagoo doorbidaya nidaamka ogolaanshaha in haruumarin lagu sameeyo taa bedelkeeda.

11 *Qaybta 4: Argagixisada* waa natiijadii baadhitaankayagii balaadhnaa ee nolosha Qofka meesha uu kasoo jeedo iyo gaarahaan diyaargarawgiisii iyo qorshihiisii weerarka. Waanu fahmaynaa inaan dadka qaar doorbidayn inay wax ku saabsan akhriyaan, laakiin waxay ahayd waajib nasaran inaanu warbixin ku saabsan wixii geliyay fikradda xagjirka ah, sababta uu u doortay New Zealand inay noqoto meesha uu weerarka argagixisada ah ka fulinayo iyo sida uu isaga ilaaliyay inaanay qaban indhaha hey'adaha qaybaha Bulshada.

12 Qofku waxa uu ahaa nin cad oo reer Australia ah oo 28 jir noqday March 2019kii. Waxa uu muujiyay dabeecad takoor ah isagoo da'yar. Waxay u eegatahay khibraddii noloshiisu miduu ciil ka buuxay, waxaana lagu beeray xagjirnio isagoo noqday xagjir wata aragti garabka midig ah oo ku aaddan dadkuu u arko hadidaad ama cadaw. Ugu dambaystii waxa uu abaabulay rebshad.

13 Qofku wuxu soo gaadhay New Zealand 17kii August 2017kii. Isagoo ah Australian, waxa loo ogolyahay inuu ku noolaado New Zealand. Markuu yimi maalmo yar gudohood ka dib, wuxu u guuray Dunedin waqtigaa intii ka dambaysay noloshiisa inteeda badan wuxu u huray inuu qorsheeyo oo u diyaargaroobo weerarka argagixisada ah. Waxaanu eegnay isticmaalkiisa saaxadda Khadka tooska ah intii ka horaysay iyo markuu socday weerarkii argagixisada ahaa. Waxa kale oo aanu baadhnay siduu Qofku ku helay rukhsadda qoryaha iyo siduu markii dambe gacanta ugu dhigay qoryaha iyo rasaasta. Waxaanu dabagalay siduu tababarka weerarka argagixisada u qaatay isagoo aqoon dheerad ah u yeeshay qoryaha iyo isagoo jidhkiisa ku dhisay gymka sterroids-na qaatay si uu isu weyneeyo.

14 Qofku muu lahayn saaxiibo dhaw inta bandanna wuu iska ilaalinjiray meelaha bulshadu ku kulamaan, markaa wuxuu ahaa mid bulshada ka go'doonsan. Dhaqaale ahaan wuu madaxbanaanaa in badanna wuu safrijiray. Markii uu u diyaargaroobaayay ee qorshaha weeraka argagixisada ah samaynaayay wuu habaysnaa maskaxdiisa oo keliyana wuu ku socday. Wuxuu ahaa qofku mid ismuujinkara dad la dhaqan wanaagsanna leh markaa aan shaki keenayn. Looma arkin qof khatar keenikara. Waxaanu ku faahfaahinay sababaha arrintan warbixinta.

15 Waxaanu si faafaahsan ugu sharaxnay *Qaybta 4: Argagixisada*, waxaanu ku qanacsanahay inuu keli ku ahaa falka.

16 Waxaanu aad ugu eegaynaa *Qaybta 5: Ogolaanshaha Qoryaha*.

17 Inkastoo aanu qofku taariikh ku lahayn New Zealand, arjigiisii liisanka qoryha waxa lagu ogolaaday saddex bilood gudahoo kadib markuu waddanka yimi. Waxa u magacaabay ciddi loo tixraacayay walaashii, markaa walaashii oo ku noolayd Australia darted shaqaalihii liisanka qoryaha bixinayay waxay ka dooneen inuu bedelo qofka tixraaca ah. Ugu dambaystii laba tixraac (qof weyn iyo waalidkii) oo degan New Zealand oo isku sheegay qofka "saaxiibadii", ayaa isu taagay inay cadeeyaan inuu yahay qofku mid miyir qaba oo caadiya. Qofka weyn (oo aanu ugu yeedhno saaxiibkiisa game-ka) waxa uu la ciyaarayay ciyaaraha Khadka tooska ah Qofka in ka badan toban sannadood laakiin runahaan waxay wada socdeen in ku dhaw 21 maalmood tobankaa sannadood oo dhan. Saaxiibka ay gameka wada ciyaaraan waalidkii waxay Qofka wada joogeen keliya in ku dhaw todoba maalmood muddo afar sannadood ah. Labada xaaladoodba, waqtiga ay Qofka wada qaateen wuu kala fogfogaa.

18 Waxaanu go'aaminay muddadii ay socotay shaqada codsiga liisanka qoryaha, inaan sifiican looga fiirsan saaxiibka gameka iyo waalidkii inay Qofka yiqiineen muddo ku filan si ay ugu noqdaan qaar ku haboon in loo tixraaco damiinahaan. Waxaanu ka doodaynay waxa dhicilahaa hadii aan la ogolaan codsiga waqtigaa ama sikale loo maamulilahaa.

19 Waxaanu ogaanay in Booliiska New Zealand siday u maamuleen nidaamka liisan bixinta qoryaha aanay waafaqsanayn heerkii looga baahnaa. Sababaha sidaasi u dhacday waxa ka mida inaanay shaqaalah liisan bixinayay lahyan hab ay raacaan, tababar iyo iyadoo aan loo dhammayn hanuuninta habka looga shaqeeyo codsiyada oo aan qofkii laga dhigtay tixraaca la waraysan Karin shakhsiahaan.

20 Marka macnaha xaqiiqda loosoo noqdo, kol hadaanay waxkabelidda xeerka qoryaha gacantayada ku jirin, waanu ka hadalay gacan ku haynta qoryaha boobaha fudud ah. Way debecsanayd, si hawlyarna waa looga faa'iidaysan karaayay Qofkuna wuxuu ka dheeldheelo ayuu ka dhigtay. Khatarta in New Zealand loo adeegsan karo hub halis ah weerar argagixiso ayaa la aqoonsaday dhawr jeer. Waxa la sameeyay hal diginiin ah kadib weerarkii argagixisada ahaa ee Oslo iyo Utoya Island oo Norway ku yaal sannadkii 2011kii, halkaasoo la adeegsaday qori boobe ah.

21 Waxaanu si qoto dheer ugu baadhaynaa wixii ay ka ogaayeen hey'adaha Bulshada Qofka weerarkii argagixisada ahaa hortii, *Qaybta 6: Maxay hey'adaha qaybaha Bulshada ka ogaayeen qofka argagixisada ah*. Waxaanu weydiinay su'aalo faafaahsan 217 hey'adood oo kamida qaybaha Bulshada ballaadhan waxanaanu ka helay toban hey'adood war aanu ku qanacnay inuu la xidhiidho Qofka.

22 Warka keliya ee si toosa uga hadlaayay weerarkii argagixisada ahaa wuxu ahaa email uu Qofku udiray Adeega Baarlamaanka (iyo siyaasiyiin, warbaahinta iyo shakhsiyado weriyeyaal ah) siddeed daqiiqadood kahor intaanu weerarka argagixisada ahi bilaabmin. Warka muhiimka ah ee ku saabsanaa weerarka (xagga boqcadda) wuxu ku qorraa manifesto 74 bog ah oo ku lifaaqnayd lana xidhiidhaysay emailka. Waqti ayay ku qaadatay inay Adeega Baarlamaanku furaan emailka, akhriyaan oo fahamaan manifestada markaana u gudbiyaan Booliiska New Zealand. Markaaba waxaa bilaabmay weerarkii argagixisada ahaa. Arrintan waxaanu si faahfaahsan ugu falanqaynaynaa *Qaybta 6: Maxay hey'adaha qaybaha Bulshada ka ogaayeen qofka argagixisada ah*, waxaanu ku qanacsanahay inay Adeega Baarlamanka raaceen habkii saxda ahaa oo dhaqso ugu dhaqaaqeen.

23 War kale oo Qofka laga ogaa badankiisu ma ahayn wax la tixraaco. Hadii dib loo eego, waxaynu arkikarraa inay qaarkood la xidhiidhayeen Qofka qorshihiisii iyo diyaargarawgii. Sikastaba ha ahaatee, markaa may muuqanayn iyadoo warku googo'naa darted. Inyar oo kamidina ugamay digteen hey'adaha Bulshada weerar argagixiso ee soo socda. Hey'adaha qaybaha Bulshada ee ku luglahaa kahortagga argagisada dedaalkooda looguma talogelin inay soo ururiyaan oo isugeeyaan wararka sida caafimaadka iyo kaydinta liisan bixinta qoryaha. Arrintan waxaanu si faahfaahsan ugu falanqaynaynaa *Qaybta 6: Maxay hey'adaha qaybaha Bulshada ka ogaayeen qofka argagixisada ah*.

24 *Qaybta 7: Kawarhelka cidda noqonkarta argagixiso*, waxaynu falanqaynaynaa caqabadaha kawarhelka iyo furfuridda argagixisada. Weerarka argagixisada ah ee qof keligii ahi ku kaco wey adagtahay inay sirdoonka, hey'adaa ammaanka iyo hey'adaa fulinta sharciga ka warhelaan oo joojiyaan. Inkastoo taasi jirto, weerarro argagixiso oo badan oo qof keligii ahi ku talo jiray ayaa runtii la kala tuuray. Qaybtan waxaynu u isticmaalaynaa Qofka arrin wax laga barto si aynu utijaabinno una qeexno arrimaha socda intaynaan ku dhaqaaqin inaynu si mugleh u fiirinno ka hortagga argagixisada.

25 Dedaalka kahortagga argagixisada (oo noqda qayb hoostimaada Nidaamka Ammaanka Xuduudda Dalka) waxa lagu eegayaa *Qaybta 8: Qiimaynta dedaalka loogujiro Kahortagga Argagixisada*. Hey'adaha Bulshada ee ku hawllan dedaalka lagaga hortegaayo argagixisada waxa ku jira Kooxda Ammaanka Dalka oo ka tirsan Waaxda Ra'iisal Wasaaraha iyo Golaha Wasiirrada, Xafiiska Ammaanka Xidhiidhka Dawladda, Socdaalka New Zealand, Adeegga Cashuuraha New Zealand, Booliiska New Zealand iyo Adeega Sirdoonka New Zealand.

26 Su'aashii ugu adkayd ee lana weydiiyay si aanu uga hadallo dedaalka kahortagga argagixisada waxay tahay in hey'adaha qaybaha Bulshada ay khusayhsaa ku guuldaraysteen inay fishaan ama qorshe usameeyaan weerarrada argagixisada waayo sidii saxnayd ayaan laysugu qaybin wixii loo hayay (ciidan iyo kheyraadba) kahortagga argagixisada ama in laga hormariyay baqdin laga qabay argagixiso kale. Su'aashu uma qalanto jawaab sahlan, laakiin waxaanu arrimaha uga shaqaynaa si habaysan.

27 Meesha waxbaa jira ay tahay in la aqoonsado. Sirdoonka iyo hey'adaha ammaanka marka la isbarbardhigo way yartahay ogolaanshahooda bulshadu. Tan iyo sababo kale oo aanu ogaanay darteed, hey'adaha qaybaha Bulshada ee gacanta ku haya dedaalka kahortagga argagixisada waxay lahaayeen karti xadidan iyo awood – aad uga yar intay qaar badani rumaysanyihiin. Fikradda ah inay sirdoonka iyo hey'adaa ammaanka ku hawllanyihiin dabagal balaadhan ay ku hayaan reer New Zealand waa hummaag ama wax aan jirin. Marka dib loo eego 2014kii, sirdoonka iyo hey'adda ammaanka way jilicsanaayeen. In dib loo dhisana laguma dhaqaaqin ilaa badhtamihii 2016kii lamana dhammayn markuu weerarkii argagixisada ahaa dhacay 2019kii.

28 Qiimaynta aanu wadnaa waxay ugu horayn ku foogan tahay waqtigii udhexeeyay 2016kii iyo 2019kii. Mudadaa wax kowaad aanu ku foognayn (iyadoo aan gaar u ahayn) oo ahaa waxay soosaaraan kahortagga argagixisada oo ku jeeday wixii loo arkaayay inuu keenayo baqdin oo ahaa Argagixisada Xagjirka Islaamistka. Waa muhiim in la sheego hey'adda kahortagga argagixisada inaanay dabagelin tilmaamihii ku saabsanaa inay jirikarto argagixiso garabka-midiga oo xagjir ahi. Markaa, in laysku kobo baqdinta ka imanaysa argagixisada Islaamka Mayalka adag may ahayn inay ka celiso abbaaridda tilmaamaha kale markay soo baxaan.

29 2016kii, Adeegga Sirdoonka Ammaanka New Zealand waxay suuradiyeen in la bilaabo in la fahmo inay soo baxayaan hanjebaado argagixiso oo kale taasina inoo ahayd yool, laakiin cidi waxay dabagashaa shey keliya marka ay leeyihiin awoodda ay sidaa ku samaynayaan. Shaqadani waxay runtii bilaabantay May 2018kii, iyadoo mashruucyadaa mid ahaa in culays la saaro harumarinta fahamka inuu xagjir garab-midig ahi kajiro New Zealand. Waqtigaa, Adeegga Sirdoonka Ammaanka New Zealand wuu xaddidnaa fahamkooda xagjirka garabka-midig shaqadii laga hayayna lama dhammayn markuu dhacay weerarkii argagixisada ahaa.

30 Shaqadii sirdoonka Booliiska New Zealand hoos ayay udhacday oo laga soo bilaabo 2015kii may fulinayn qiimayntii ladagaalanka khatarta argagixisada ee istaraatijiga ahayd.

31 Waxaanu go'aan ku gaadhnay inay kafiirsasho la'aani ka jirtay wax tarka ladagaalanka khatarta argagixisada Islaamka xagjirka ah, laakiin sababta arrintani waxay u baahantahay in la furfuro.

32 Werwerka aanu ka qabno ufiirsashada ilaha ladagaalanka argagixisada waa mid ka mida shaqada socota. Waxa jira laba weji oo ay tani leedahay. Ka kowaad, may jirin qiimayn weyn inay jiraan awoodo kale oo leh khatar argagixiso. Markaa in laga fiirsado ilaha ladagaalanka argagixisada kuma salaysnayn isbarbardiga wax khatar oo la falanqeeyay. Kalabaad, muu jirin in lays ogeysiiyay go'aan ka dhexeeya nidaamka oo dhan in habkan wax loo wado. Tan waxaanu uga jeednaa go'aan ay gaadheen hey'adaha Bulshada ay arrintani khusayso oo dhammi, iyadoo la ogyahay inay jiraan baqdino argagixiso kale oo muuqday kuwaasoon la fahmin. Tanina sidoo kale waxay ubaahantahay sharaxaad kooban.

33 Adeegga Sirdoonka Ammaanka New Zealand waxay go'aan ku gaadheen inay xoogga ku saaraan waxay haystaan ee kooban kahotagga argagixisada ee khatarta jirtee argagixisada Islaamka xagjirka ah. Waxay tani ahayd qayb ahaan iyagoon karti lahayn ilaa badhtamihii 2018kii ay wax kaga qabtaan khatartaa iyo, isla markaa, inay bilaabmaan khataro kale. Hey'ado qaybaha Bulshada ah oo kale ayaa gacan kulahaa dedaalka ladagaalanka argagixisada kamay hawlgelin kawadahadalka warka ku saabsan habkan dabbaqaadiisa, ay ku jiraan khataraha aan qarsoonayn. Markaa may jirin wax laysu sheegay iyo go'aan ay nidaamka oo dhammi wada gaadheen in habkaa lagusii dhaqaaqo kaasoo aynu u aragno inaanu habboonayn.

34 Iyadoo waxaas oo dhan la yidhi, waxaanu u aragnaa in loo buriyo khayraadka khatarta argagixisada Islaamka xagjirka ah inaany ahayn sababta aan loo dareemin diyaargarawga iyo qorshaynta weerarkiisa argagixiso ee qofka. Markaad eegto isilaalinta joogtada ah ee uu qofku ku shaqaynaayay, iyo xaaladda sharcidejintu wax ku ogolaanaysay, taasoo ah siday ugu dedaalaan kahortagga argagixisadu u shaqayso iyo xadidnaanta kartida iyo awoodda hey'adda kahortagga argagixisada, ma jirin inay suurtogal noqoto in la dareemo hadaanay iman fursad lamafilaan ahi. Iyadoo ay jiraan werwerrada aanu hadda ka hadalay iyo arrimo nidaamahaaneed oo kale waxaanu dib ugu eegnay *Qaybta 8: Qiimaynta dedaalka kahortagga argagixisada*, iyo xaqiida jirta ee ah inaan la dareemin qofka lafteedu muu ahayn guuldaraysi sirdoon.

35 Waxaanu si baahsan u eeganay kartida kahortagga argagixisada. Horeba waxaanu u sheegnay xadidnaanta aqbalaadda Bulshada, kartida iyo awooddooda. Badhtamihii tobankii sannadood ee aynu soo dhaafnay, mawduucyada kahortagga argagixisada, sirdoonka iyo ammaanku waxay noqdeen sun siyaasadahaan iyo sumcadahaanba. Wuu yaraa lahaanshaha siyaasadeed. Hogaanka qaybaha Bulshada wuxu u burburay iyadoo la baahiyay nidaamkii ammaanka dalka iyadoo hey'adaha qaybaha Bulshada ay faraha lasoo galeen awoodda kahortagga argagixisada iyagoo ku shaqaynaya hab si debecsan loo maamulay.

36 Sidii looga hadlay, dibudhiska awoodda iyo kartida sirdoonka iyo hey'adaha ammaanka wuxuu bilaabmay badhtamihii 2016kii. Inkastoo aharuumar la sameeyay, in badan oo kale ayaa loo baahanyahay. Sidoo kale, isbeddel nidaam ayaa loo baahanyahay, kaasoo ay kamid yihiin in la sameeyo sirdoonka dalka iyo hey'adda ammaanka. Tani waxay keenaysaa hab aad u nidaamsan oo lagaga hortago argagixisada iyo kahortagga rebshadaha dedaalka xagjirnimada. Maamulaha Guud ee hey'addan cusub wuxu noqondoonaa lataliyaha qaranka ee sirdoonka iyo ammaanka, iyadoo hey'addu helikarta inay ka faa'iidaysato oo ku foognaato arrimaha sirdoonka iyo ammaanka oo keliya. Waxay siindoontaa istaraatijiyad talobixineed oo aad u ballaadhan, haruumarin kahortag argagixiso oo istaraatiji ah iyo inay maamulaan xeerka khuseeya ammaanka qaranka. Hey'adani waxay la wareegidoontaa mas'uuliyadda haruumarinta qiimaynaha sirdoonka, ay hoosta dhigeen qolada arragtida fog ee dejinta siyaasadda, inay ka mas'uul noqdaan naqshadaynta heykalka maamulka waxqabadka iyo ilaalinta wixii horusocodkeeda kasoo horjeeda.

37 Waxaanu garwaaqsanahay intay indhahayagu ku foognaayeen awoodda kahortagga argagixisada waxaa jiray talooyinkayaga muhiimka ahaa in nidaamka dhammaan isbedel laga sameeyo la xiriira baqdingelin oo dhan iyo arrimaha sirdoonka. Waa wax aan suurtogelayn in la abuuro mas'uuliyado kahortag argagixiso.

38 Tan iyo talooyin faahfaahsan oo kaleba waxay ku soo baxeen *Qaybta 10: Talooyinka*.

39 Talooyinkayaga oo sibuuxda loo hirgeliyaa waxay dhalindoontaa dedaalka kahortag argagixiso oo sifiican loo abaabulay oo wata awood iyo karti la wanaajiyay iyo haykal xeer aan la adkayn. Waxaanu filaynaa inaanu aragno hawlgelin baahsan mid siyaasadeed, Bulsho iyo wadahadal iyo kormeer adag. Tani waxay keenaysaa aaminaad bulsho oo weyn markaana Bulshadu ogolaato. Waxaanu jecelahay inaanu aragno iyadoo laga wadahadlayo kahortagga argagixisada oo caadi noqday. Talooyinkayagu waxay sidaan farsamooyin tan suurtogelinaya.

40 Maqnaanshaha wadahadalku ilaa maanta wuxu ku lahaa cawaaqib.

41 Ilaa 2015kii, dawladii kala dambeeyay way ka gaabinayeen inay socodsiiyaan istaratijiga kahortagga argagixisada oo dadweynaha lala horimankaro. Hal sabab ah oo sidaasi ku dhacday waxay ahayd inaan cuqdad lagu beerin bulshada Muslimka ah intaa in ka badan. Laakiin, hadii istaraajiyaddan oo kale lala wadaagilahaa bulshada iyo hadii wax wadaqabsi "wax arag, wax dheh" siyaasadu ahaanlahayd, waxa suurtogelilahaa in waxyaabo kamida Qofka qorshihiisii iyo diyaargarawgiisii loosoo sheegilahaa hey'adaha kahortagga argagixisada. Iyadoo laga faa'iidaysanayo dib u eegista, wargelintaas oo kale waxay keenilahayd fursadda ugu fiican ee lagu kala daadinlahaa weerarkii argagixisada ahaa. Istaraatijiyadda ah in dadka ay horyimaadaan hey'adda kahortagga argagixisada waxa lagayaabaa inay u eekaanlahayd in la helo siyaasado ah in meelaha dadku ku badanyahay nabadgelyadeeda sare loo qaado iyo in la ilaaliyo weerar lagu qaado kuwo noqonkara bartilmaameed. Hirgelinta siyaasadaha nooccaas ahi waxa lagayaabaa inay yarayn-lahaayeen

nafwaagii 15kii March 2019kii. Hadii la ogaanlahaa khatarta inuu qof argagixiso ahi ka faa'iidaysanayo New Zealand sharcigeeda qoryaha boobaha ah ee debecsan waxbaa laga qabanlahaa mar hore, waxay u eekaanlahayd inaanu jireen weerarkii argagixisada ahaa 15kii March 2019kii.

42 Qaybta ugu dambaysa arrimaha aanu eegaaynaa waxay yihiin wada noolaanshaha Bulshada, kamidnoqoshada iyo kala duwanaanta hadii ay New Zealand abbaarilahayd, waxay ku jirtaa *Qaybta 9aad: wada noolaanshaha Bulshada iyo aqbalaadda kala duwanaanta*.

43 Wada noolaanshaha Bulshada, kaminoqoshada iyo kala duwanaantu kamay midahayn asalkii qorshihii shaqadayada. Laakiin, markay baadhistayadii hore usii socotay ee hawlgalkayagii bulshada sii qoto dheeraaday, waxa caddaatay inay arrimahanina ubaahanyihiin hoos u eegid. Wada noolaanshaha Bulshada wuxu u leeyahay faa'iidooyin toos ah oo badan qofkasta oo Bulshooyinka ka mida. Xagga kale marka laga eego, Bulshada ku kala qaybsan siyaasadda, bulsho-ahaan, dhaqan, dabeecadda, dhaqaalaha, isirahaan ama diinku kala duwan ayay ubadantahay inay arkaan fikrado xagjirnimoo samaysma oo fida. Dedaalka in la dhiso bulsho wadanoolaata, kaminoqosho iyo kala duwanaasho lihi waxay ku darsankartaa inay kahortagto, celiso ama kahortagto xagjirnimada. Intaa waxa dheer, inaad lahaato bulsho leh wada noolaasho, kamidnoqosho iyo inay aqbalaan kala duwanaansha ayaa lafteedu wanaagsan.

44 Waanu tixgelinaa sida hey'adaha qaybaha Bulshada, dawladda hoose, qaybaha khaaska ah, bulsha rayidka ah iyo dadweynuhu inay karaan inay taageeraan oo badiyaan wadanoolaanshaha bulshada. Dedaalka Bulshada waa la burburiyay waxaanuu ku noqday jahowareer kooxo bulshada ah oo la hawlgalay. Dadweynaha oo kawada sheekaysta wadanoolaanshaha Bulshada sida la ogyahay wuu ka maqnaa meesha. Markale, waxaanu go'aan ku gaadhnay in loo baahanyahay isbedel nidaam waxaanaanu ku sheegnay fikirkayagii, *Qaybta 10naad: Talobixinaha*.

45 Warbixintan waxa ku jira 44 talobixinood oo ka hadlaya shan qayboodoo muhiim ah oo khuseeya dedaalka loogu jiro kahortagga argagixisada, nidaamka rukhsad siinta qoryaha, baahiyaha joogtada ah ee kuwii uu aad usaameeyay weerarkii argagixisada ahaa, inay New Zealand u jawaabto dadkeena ay kusii badanayso kala duwanaantu iyo inay hirgeliyaan talooyinkayaga. Arrimahan waxaa lagu qeexay iygoo faahfaahsan *Qaybta 10naad: Talobixinaha*.

46 Waxa jira mawduucyo iyo arrimo soo noqnoqonaaya oo aad u miisaan weynaa markaanu ka fiirsanay talobixinahayaga. Ta ugu muhiimsan kuwani waa baahida in laga hortago loogana hawlgalo cadaan arrimaha adag. Markii aanu baadhista wadnay waxaanu eegnay dhaqdhaqaaqa qaybaha Bulshada ee ku lugleh nidaamka rukhsad siinta qoryaha, dedaalka kahortagga argagixisada, wadanoolaanshaha bulshada iyo aqbalaadda kaladuwnaanta. Midkasta oo arrimahan kamida waxa lagu gartaa inay leedahay lahaansho siyaasi ah oo xadidan iyo inuu ka maqanyahay inay dadweynuhu ka wadahadlaan.

47 Debecsanaanta xakamaynta qoryaha boobaha ah ayaa la qiimaynaayay tobanaan sannadood iyadoo la ogaa khatarta inay argagixiso ka faa'iidaysato arrintan ilaa 2011kii. Lakiin majirin adkayn muuqata oo dawladdu ku dhaqaaday sababtoo ahayd inay taa aad uga soo horjeedeen kooxda qoryaha.

48 Muranka warbaahinta iyo caamahaan iyadoo hoosaysa bulsahadu aaminaadda iyo kalsoonida ay ku qabaan sirdoonka iyo hey'adaha ammaanka iyo weliba siyaabaha ay ushaqeeyaan hey'adaha dhaqangelinta sharciga ayaay macnaheedu noqtay inay siyaasiyiintu iska ilaaliyaan caqabadda kaga imanaysa hawlgalka bulshada ee ku saabsan kahortagga argagixisada.

49 In la dhiso wadanoolaanta bulshada, kamidahaanta iyo aqbalaadda kala duwanaanta waa yool aynu dhammaan higsanayno. Iyadoo ka jawaabiddii COVID – 19 iyo xaaladdii kasoo kabashadiisa laguna jiro mar ay bateen diiqadda, xaalado dhimir, arrimaha qabatinka, hoos u dhaca dhaqaale, sinaan la'aan imankarta iyo dagnaanta oo baahday. Marka wadanku hortiisa eego waxa timaadda fursad lagu dhiso oo kor loo qaado kaabeyaasheenna bulsho iyo adkaysiga bulshada sida kaabeyaasha dhismaha loo maalgeliyo. Waxa inoo taala hawl adag in lagu dhaqaaqo inay dhammaan dawladda qaybaheedu sameeyaan haruumar xagga isku xidhnaanta bulshada iyo in la aqbalo kala duwanaanta.

50 Waxaynu qaadanay ka hawlgalka siyaasadeed ee arrimahani inaanu sahlanayn. Laakiin inaad ku dhiirato hawlaha adag iyo in la helo dadkoo si weji furan u wada hadla ayaa muhiim ah. Hore ayaynu uga hadalay cawaaqibka ay leedahay hadii aan kor loo qaadin istraatijiyadda dadku ugu soo jeesanayaan kahortagga argagixisada oo aan la adkayn debecsanaanta gacan ku haynta qoryaha intaanu iman weerar argagixiso. Waxaanu filaynaa inay warbixintayadu dhiirindoonto xubno kaamida bulshada, mas'uuliyiin iyo siyaasiyiin si ay uga hawlgalaan wada doodid daacada si ay cidwaliba u fahamto doorkooda iyo mas'uuliyadooda inay New Zealand ahaato nabad, ammaan iyo in nabad lagu wada noolyahay. Waxa jira dardargelin ah in laga wada doodo nooca dalahaan ay New Zealand ku hammiyayso inay noqoto.

51 Ugu dambayn, New Zealand weligeed kama madhnaanayso rebshadda xagjirnimo iyo argagixiso. Xitaa haday noqonayso nidaamyada aduunka ugu wacan, ruux go'aansaday inuu noqdo argagixiso wuu ka fulinkaraa weerar New Zealand mustaqbalka. Lakiin dawladu waxay qabankartaa wax badan, marka laga bilaabo inay daacad ka noqoto daahfurnaanta iyo qalbifuraanta ay kula dhaqmaan dadka reer New Zealand. Kuligeen waynu kawada qaybqaadankarnaa dhismaha heshiis inaga wada dhexeeya oo ku saabsan qiimaha aynu wadaagno waxaanaynu doonaynaa inaynu taageerno bulshadeena iyo ta faca da'yarta waqtiga soo socda.

1 Tixraaca Shuruudaha lanaga rabay si aanu natiijo ugaadhno ayaa ahaa:

4(a) Hadii uu jiray war la bixiyay ama ay hayeen hey'adaha bulshada ay khusaysaa oo uga dig-ilahaa weerarka argagixisada ah iyo, hadii war caynkaasa la siiyo ama la hayay, sida ay hey'aduhu uga jawaablahaayeen macluumaadka noocaas ah, iyo inay jawaabtu ahayd tii ku haboonayd;

(b) Isdhexgalka hey'adaha Bulshada ay khusayso ay kamidyihiin hadii uu jiray wax lagu guul-daraystay inay warka wadaagaan hey'adadha ay khusaysaa;

(c) Hadii ay hey'adaha Bulshada ee ay khusaysaa ku guuldaraysteen inay filaan ama qor-sheeyaan weerar argagixiso oo dhacayay iyadoo aanay haboonayn fiiradooda kahortag-ga-argagixisada ama in lasoo hormariyo khatarta argagixiso kale;

(d) Hadii qaar kamida hey'adaha Bulshada ee ay khusaysaa ku guuldaraysteen inay fuliyaan heerkii looga baahnaa ama hadii kale ay wax ka qaldanaayeen, ha ahaato dhammaantood ama qaarkoode; iyo

(e) Waxkasta oo kale oo khuseeya ujeedada xog baadhista, ilaa heerka loo baahanyahay si warbixin dhan loo helo;

## Yaa ka mid ahaa Hey'adaha Qaybaha Bulshada ee wax ka yiqiin qofka argagixisada ah?

2 *Qaybta 6aad: Yaa ka mid ahaa Hey'adaha* qaybaha Bulshada oo wax ka yiqiin qofka argagix-isada ah ayaa dejinkarta cadaynta iyo waxayaabaha caqligalka ah ee aanu soo ururinay.

3 "Weerarka argagixisada" macnaheedu waa weerarkii argagixisada ahaa uu ku kacay Qofku si waafaqsan qorshihiisii iyo diyaargarawgiisii sannadihii aynu soo dhaafnay.

4 **Waxaanu helay:**

a) warka keliya ee Qofka khuseeya ee ay ogaayeen Hey'adaha Bulshada New Zealand ka hor 15kii March2019kii ay ahayd inay uga digto weerarka argagixisada ah wuxu ahaa email uu qofku usoo diray Adeegga Baarlamaanka;

b) adeegga Baarlamaanka sidii haboorayd ayay uga falceliyeen waqti caqligala gudihii mar-kaad eegto duruufaha jiray iyagoo ka jawaabaya emailka la soo diray wax yar kahor weer-arka argagixisada ah;

c) muujirin wax war ah oo kale oo la siiyay ama sikale ay u hayeen cidda ay khusayso Hey'adaha qaybaha Bulshada kuwaasoo ay ahayd inay uga digaan weerarka argagixisada ah; iyo

d) majirin in lagu guuldaraystay inay warka wadaagaan dhexdooda hey'adaha Bulshada ee ay khusaysaa.

## Qiimaynta dedaalka kahortagga argagixisada

5 *Qaybta 8: Qiimaynta dedaalka kahortagga argagixisada* ayaa dejiyay caddaynta iyo caqligalnimada wixii aanu soo ururinay.

6 Waxaanu go'aan ku gaadhnay in lagu kobo kharasha kahortagga argagixisada oo dhan hanjebaadda argagixisada Islaamka xagjirka ah intii ka horaysay markay Adeega Ammaanka Sirdoonka New Zealand bilaabeen mashruucii salka u ahaa ee 2018kii inaanu haboonayn sababtoo ah:

a) kumuu dhisnayn qiimayn war la ogaa oo ku saabsan baqdinta laga qabay argagixiso wata fikrado kale; iyo

b) kamuu soo bixin go'aan uu u dhanyahay nidaamka oo dhammi, inkastoo ay meesha ka maqnayd qiimayn noocaas ahi, ilaha kahortagga argagixisada waxay ahayd inay sii socto wixii loo qoondeeyo hanjebaadda ka imanaysay argagixisada Islaamka xagjirka ah.

7 **Waxaanu helay in:**

a) Sidii aan haboonayn ee loogu badiyay dhaqqlaha hanjebaadda argagixisada Islaamistka xagjirka ahi kamay qaybqaadan sida aan loo dareemin qofka intuu qorshaha iyo diyaargarawga ugu jiray weerarkiisa argagixisada ah. Sababtaa darteed, Hey'adaha Bulshada ee ku luglahaa dedaalka kahortagga argagixisada kumay guuldaraysan inay fishaan ama ay qorshe u sameeyaan weerarka argagixisada ah ay ugu wacnayd iyadoo si qaldan loo qaybiyay dhaqaale loogu talogalay kahortagga argagixisada.

b) hey'ad Bulsho keliya oo ku luglahayd dedaalka kahortagga argagixisada kumay guuldaraysan inay la timaado heerkii looga baahnaa ama hadii kale qaldanaa marka la eegona u ahaa waxta qorshihii iyo diyaargarawgii qofka inaan la dareemin weerarkiisii argagixisada ahaa.

## Liisanka Qoryaha

8 *Qaybta 5: Liisanka qoryaha ayaa* dejinaya caddaynta iyo siday caqligal u yihiin waxaanu soo ururinay.

9 **Waxaanu helnay in:**

a) Booliiska New Zealand way ku guuldaraysteen inay gaadhaan heerkii laga rabay siday umaamuleen nidaamka liisanka qoryaha iyagoo:

(i) buugga qoryaha, hanuuniyaha tusaha baadhista (The Master Vetting Guide) iyo tusaha baadhista liisanka qoryaha (Firearms Licensing Vetting Guide) muusiin hanuuniye isku xidhan oo dhan markii ay ka shaqaynayeen codsiyada halkaasoo codsaduhu ku guuldaraystay inuu keeno ehel dhaw oo la tixraacikaro oo la waraysankaro qofahaan;

(ii) Booliiska New Zealand soomay diyaarin qalqaalooyin ay ku hubinayaan shaqaalaha bixiya liisanka qoryaha inay helaan tababar nidaamsan iyo dib u eegis joogto ah siday u shaqaynayaan; iyo

(iii) markii lala macaamilaayay codsiga Qofka ee liisanka qoryaha, Booliiska New Zealand sidii haboonayd umay qaban arrintan weliba inay saaxiibka uu la ciyaarijiray iyo waalidkii uyaqaaneen Qofka sifiican si ay usiiyaan tixraac.

# Talooyinka oo lasoo koobay

1 Shuruudaha Tixraacayagu waxay nagu hogaamiyeen inaanu talooyin bixino aanu uaragno inay haboonyihiin; sida soo socdaa:

> 5(1)(a) hadii ay jirtay wax haruumara si loosoo ururiyo war, wadaagid iyo hawgallada falanqaynta ay sameeyaan hey'ado Bulsho ay khusayso, kuwaas oo ka hortegilahaa weerarka argagixisada ahaa, ama karayay ka hortegga weerarkan argagixisada oo kale mustaqbalka, oo ay ku jiraan, aanse ku koobnayn, waqtigiisa, ku haboonaanta, waxtarka iyo xidhiidhinta in warka lays ogeysiiyo, la wadaago ama la iswaafaqsiiyo hey'adaha Bulshada ay khusayso; iyo
>
> (b) waa maxay isbedelada, haday jiraan, ay tahay in haruumarin lagu sameeyo nidaamka hey'adaha Bulshada ay khusayso, ama dhaqamada shaqaynaya, si loo hubiyo kahortagga weerarka argagixisada ah ee kan lamida mustaqbalka; iyo
>
> (c) waxkasta oo kale ay intaas sareba khusayso, ilaa heerka ay tahay lagama-maarmaan in warbixin dhan laga keen.

2 Talooyinkayagu waxay ku yaaliin *Qaybata 10: Talobixinaha waaxaanay kaga halaynaa qaybaha soo socda*:

a) in haruumar lagu sameeyo dedaalka kahortagga argagixisada New Zealand;

b) in haruumar lagu sameeyo nidaamka lagu bixiyo liisanka qoryaha;

c) in la taageero soo kabashada socota ee baahiyaha qoysaskii dhibtu gaadhay, badbaadeyaashii iyo goobjoogeyaashii weerarkii argagixisada ahaa ee 15kii March 2019kii;

d) in haruumar lagu sameeyo siday New Zealand uga jawaabto dadkeena uu ku badanaayo kala duwanaanshuhu; iyo

e) in la hirgeliyo talooyinka.

3 Talooyinka waxa abaabulay afar mawduuc:

4 **Waxa loo baahanyahay dawlad hogaan iyo hagid adag leh si** ay u keento kormeer shaqeeya iyo cid loo raaco dedaalka kahortagga argagixisada. Tani waxay hubinaysaa in doorarka iyo mas'uuliyadaha si fiican loo gartay kuna taxan Dhimidda, isdiyaarinta iyo gaadhsiinta kabasho heer qaran, gobol iyo heerka xaafadeed iyadoo kheyraadka si sax ah loogu fiirsanayo.

5 Waxa loo baahanyahay dawlad hogaan iyo higsi adag leh si ay ugaadhsiiso New Zealand (gaarahaan qaybaha Bulshada) si ay uga jawaabto oo u qabatinto shacabka New Zealand ay kusii badanayso kala duwanaantu iyo si loo dhaqan geliyo isbedelka bulshada ee waqtigaa oo caawindoona in la helo New Zealand aamin ah laguna wada noolaankaro.

6 **Go'aan qaadasho dawladeed oo shaqasya oo lala xisaabtamikaro** wuxu suurtogelindoonaa siyaasadaha qaybaha Bulshada, mashaariicda adeegyada ay tahay in la naqshadeeyo (design) oo la gaadhsiiyo lana jaanqaada baahiyaha Bulshada New Zealand ay sii badanayso kala duwanaanshaheedu. Qaybaha Bulshada (gaarahaan hey'adaha ku lugleh dedaalka kahortagga argagixisada) waxay u baahanyihiin inay bedelaan sida ay ula hawlgalaan shucuubta kala duwan. Qaybaha Bulshada fikirkoodu waa inuu isubedelaa inuu qiimeeyo shucuubtu inay wax ku darsadaan go'aamada, daahfurraanta iyo in loo hawlgalo dood balaadhan

7 **Qof kasta oo kamida bulshada wuxu ku leeyahay door inuu ka dhigo New Zealand nabad iyo inuu qofkastaa ka midnoqdo bulshada,** laakiin si looma wada fahansana doorarkaasi waxay yihiin, siday isugu xiranyihiin iyo waxay tahay inay raadiyaan si ay ugaadhaan. Waa muhiim inay kuu caddaadaan doorka iyo mas'uuliyadaadu.

8 Si loo hubiyo inuu qofkastaa ogyahay doorka ay leeyihiin si ay New Zealand nabad iyo in laga wada midnoqodo, dawladdu (iyo hey'adaha qaybaha bulshada ee ku lugleh dedaalka kahortagga argagixisada) waa inay hubiso in dedaalka kahortagga argagixisada ay qiimeeyaan dadka ay doonayaan inay ilaaliyaan. Kor u qaadidda aamminaadda iyo kalsoonida shacabka New Zealand ee ku jira dedaalka kahortagga argagixisada waqti ayay qaadanaysaa, markaa shaqada la qabanayaa waa inay degdeg u bilaabanto. Sidoo kale, dawladdu waa inay fahamtaa macnaha ay leeyiin dadka reer New Zealand ee isbedelayaa New Zealand bulsho ahaan oo kor ugu qaadaan fariimo joogto ah oo ku saabsan faa'iidada ay leedahay kala duwanaanshuhu iyo kamid ahaanshaha Bulshada.

9 Intaas oo dhammi haday noqoto gundhig, **New Zealand waxay ubaahantahay xeerar iyo siyaasado ku habboon ujeedada**. Tan waxa kordhiyay si loo hubiyo Xeerka Sirdoonka iyo Ammaanka 2017kii iyo Xeerka Cadaadinta Argagixisada 2002dii oo labadooduba ah qaar ujeedada ku habboon siinaya dembiya nacayba ee la galo, samaynta hab shaqaynkara si khudbadaha nacaybka, iyo dhiirigelinta in si fiican loo diiwaangeliyo marka la soo sheego dembi nacayb ah. Waxa kale oo muhiim ah Booliiska New Zealand inay haruumar ku sameeyaan sida ay umaamulaan nidaamka lagu bixiyo liisanka qoryaha.

## Talobixinaha si loo haruumariyo dedaalka kahortagga argagixisada

**Waxaanu ku talinaynaa inay Dawladdu:**

1. **Hubiso** in wasiir loo dhiibo mas'uuliyadda iyo la xisaabtanka si uu uhogaamiyo isuna duwo dedaalka kahortagga argagixisada.
2. **Disto** sirdoon qaran iyo hey'ad ammaan oo cusub oo sifiican u qalabaysan sharciahaanna loo egmaday inay mas'uul ka noqdaan istraatigiyadda sirdoonka iyo hogaaminta hawlgalada ammaanka oo ay kamidyihiin:
    a) Madaxa fulinta sirdoonka iyo ammaanka oo loogu talogalay inuu la taliyo Ra'iisal Wasaaraha iyo Golaha Wasiirada oo uu gudoomiyo Gudida Ammaanka iyo Sirdoonka ama awoodda maamul ee cusub (Talobixinta 3);
    b) Ku shaqaynaya madaxa qaybeed iyo xidhiidhiye ay leeyihiin istaraatijiyada arrimaha sirdoonka iyo ammaanku;
    c) Haruumarinaya istaratijiyada kahortagga argagixisada oo ay ku jirto inuu kahortago rebshadaa xagjirnimada (Talobixinta 4);
    d) Siiyaa talo siyaasadeed istaraatiji wasiir(rada) mas'uulka ka ah sirdoonka iyo arrimaha ammaanka;
    e) Qiimayn sirdoonka iyo meel fog wax ka eegid ay weheliso khibrad dheeri;
    f) Hogaaminaya la hawlgidda shacabka, bulshada rayidka ah, dawladda hoose iyo qaybaha khaaska ah oo lagala shaqeeyo sirdoonka istaratijiga ah iyo arrimaha ammaanka;
    g) Hubinaya dedaalka kahortagga argagixisada inuu waafaqsanyahay ma'uuliyadaha xuquuqda aadamaha New Zealand ee gudaha iyo debedaba;
    h) Si mug leh uga faa'iidaysanaya qaab dhismeedyada maaraynta xaaldaha degdegga ah ee heer degaan iyo mid gobolba;
    i) Kormeerka waxqabadka nidaamka iyo ka warbixintiisa; iyo
    j) Wasiirku inu kala xisaabtamo siday u sheqeeyeen dedaalka kahortagga argagixisada (Talobixinta 1).

3. **In la baadho** farsamo kale oo bedesha dabeecadda iskaa wax u qaboda ah ee Gudida Ammaanka iyo Sirdoonka oo ay ku jirto in la dhiso Gudida Fulinta ee ka Dhaxaysa Qaybaha sida loo sameeyay Xeerka Adeega Bulshada 2020 ilaa, ay ku jiraan waxyaabo kale:

   a) Toosi oo isku dubarid shaqada, qorshaynta iyo dejinta miisaaniyadda oo dhan ee hey'adaha qaybaha Bulshada ay khusayso iyadoo la beegsanayo arrimaha Sirdoonka iyo Ammaanka oo dhan;

   b) La wargeliyo Golaha Wasiirada Xiriirka Debedda iyo Gudida Ammaanka, oo ay ku jiraan xaaladaha jooga iyo khatarta degdegga ah iyo hanjebaadaha, oo noqda hab saddex biloodle ah;

   c) In la tixraaco dedaalka kahortagga argagixisada:

      (i) Golaha Wasiirada kala tali istaratijiyadda oo ka hadlaysa xagjirnimada iyo kahortagga, ogaanshaha, oo ka jawaabaysa hanjebaadaha socda iyo kuwa soo baxaayaba ee rebshedaa xagjirnimada ah wada iyo argagixisada samaysantay waana in la hawlgeliyaa Sirdoonka Qaranka iyo Hey'ada Ammaanka (Talobixinta 4); iyo

      (ii) Hubi dhaqdhaqaayada si aad u fuliso istaraajiyadda ka hadlaysa xagjirnimada iyo kahortagga, ogaanshaha iyo in laga jawaabo hanjebaadaha socda iyo kuwa soo baxaayaba ee rebshedaa xagjirnimada ah wada iyo argagixisada waana in la suuradiyo, la isku xidho oo dusha lagala socdo.

4. **Haruumari oo hirgeli** istaraatijiyad wajahaysa dadweynaha oo ka hadlaysa xagjirnimada iyo kahortagga, ogaanshaha oo ka jawaabaysa hanjebaadaha socda iyo kuwa soo baxaayaba ee rebshedaa xagjirnimada ah iyo argagixisada sida:

   a) waxa waday sirdoonka qaranka iyo hey'adda ammaanka cusub (Talobixinta 2);

   b) waxay haruumariyeen iyagoo la shaqaynaya bulshooyinka, bulshada rayidka ah, dawlada hoose iyo qaybaha khaaska ah;

   c) waxa dejiya ujeedada iyo jihada istaraatijiyadda, leh bartilmaameed, guulo la beegsado iyo talaabooyin wax qabada;

   d) dejiya kala mudnaanta dedaalka kahortagga argagixisada dhamman, Dimista, Diyaargarawga, Kajawaabidda iyo kasoo Kabashada;

   e) qeexidda doorarka iyo mas'uuliyadaha hey'adaha qaybaha Bulshada, shucuubta, bulshada rayidka ah, dawladda hoose iyo qaybaha khaaska ah si loo fuliyo istaratijiyadda dhammaan Dimista, Diyaargarawga, Kajawaabidda iyo Kasoo kabashada;

f) in laga helo kormeer wasiirka mas'uulka ka ah (Talobixinta 1); iyo

g) loogu sameeyay dib u eegis saddex sanno gudahood markii la daabacay iyagoo la shaqaynaya hey'adaha bulshada, shucuubta, bulshada rayidka ah, dawladda hoose, qaybaha khaaska ah iyo Kooxda kala Talisa kahortagga argagixisada (Talobixinta 7).

5. **Wax ka bedel** Xeerka Maaliyadda Dawladda 1989 si looga baahdo hey'adaha sirdoonka iyo ammaanka inay siiyaan warbixinta waxqabad ee noqonkarta mawduuca waxqabadka hanti dhawrka uu sameeyo Hantidhawraha Guud.

6. **Xoogee** doorka ay leeyihiin Sirdoonka Baarlamaanka iyo Gudida Ammaanka si ay u karikaraan inay keenaan kormeer baarlamaan oo fiican xog dhanna haya taas oo ay fuliyaan Nidaamka Ammanka Qaranka oo ay ka midyihiin dedaalka kahortagga argagixisada lana dejiyo kala mudnaanta iyo inay xubnahu gelikaraan warka xasaasiga ah inta lagama-maarmaanka u ah kormeerkan oo kale.

7. **Ku hag Madaxa** Fulinta sirdoonka qaranka iyo hey'adda ammaanka ee cusub (Talobixinta 2) inuu dhiso Guddi kala Talisa kahortagga argagixisada:

a) ka mas'uula inay siiyaan talo sirdoonka qaranka iyo hey'adda ammaanka iyo Gudida Ammaanka iyo Sirdoonka ama cidda beddesha (Talabixinta 2 & 3); iyo

b) in la dhiso hawlgallo, xagga Xeerka sida ugu dhakhsaha badan ee loo samaynkaro, iyadoon la daahin dhisiddeeda.

8. **Ku hag Madaxa** Fulinta sirdoonka qaranka iyo hey'adda ammaanka ee cusub (Talobixinta 2) inuu ku daro taloahaan Ammaan Qaran iyo Mudnaanaha Sirdoonka iyo warbixita sannadlaha ah ee hanjebaado daboolka ah (Talobixinta 17), iyadoo lasoo koobay taladii sannadkii lasoo dhaafay ay ka bixiyeen Gudida Talobixita kahortagga argagixisada (Talobixinta 7) iyo falalkii la qaaday ee lagaga jawaabay taladaa.

9. **Ku hag** Sirdoonka Qaranka ee cusub iyo Hey'adda Ammaanka (Talobixinta 2) inay waqtigaa dhexdiisa Waaxda Ra'iisalwasaaraha iyo Baarlamaanku haruumariyaan siday uga shaqayan lahaayeen inay xogwadaag yeeshaan Sirdoonka iyo Ammaanku, waxa kamida:

a) in la dhaqaajiyo isbedel ku wajahan mabda'a ah "waxa loo baahanyahay in la ogaado" oo ah dhamman kuway khusayso Hey'adaha Bulshada , iyadoo fiiro gaar ah la siinaayo Dawladda Hoose oo ay ka midyiin heykalada maamula adeegga degdegga ah ilaa heer degmo iyo gobol, si loo hubiyo inay suurtogeliso halkay ka yarayn lahayd xog wadaagga; iyo

b) in la kormeero hirgelinta lix bilood gudahood talobixinihii 2018kii in *Dib loo eego Nidaamka kala Saaridda Ammaanka New Zealand*:

   i) in la balaadhiyo mabda'yada nidaamka kala saaridda si loo helo inaanu ahaanin warku qarsoodi muddo aan la garanayn iyo in, hadii shaki ku jiro heerka qarsoodinimo, inuu warku heerka ugu hooseeya qarsoodi u noqdo;

   ii) in lagu sameeyo dib u eegid iyo xoojin hagidda haruumarinta tababarka Hey'adahan Bulshada;

   iii) in lagu dhaqmo hab nidaamahaan kaydka taariikhiga ah laga saaro qarsoodinimada; iyo

   iv) in la sameeyo tilmaameyaal hawlgal iyo waxqabad ku saabsan nidaamka wax loo kalasaaro (sirahaan).

10. **Wax ka bedel** Xeerka Sirdoonka iyo Ammaanka ee 2017kii iyadoo la tixgelinaayo heshiis toosa oo la wadagalo, in loo baahdo sirdoonka qaranka iyo hey'adda ammaanka cusub, oo muda Waaxda ra'iisalwasaaraha iyo Baarlamaanka, ay joogto ugu gudbiyaan wasiirka ka mas'uulka ah dedaalka kahortagga argagixisada markay dhismaan ay hirgalaan.

11. **Ku hag Madaxa** Fulinta sirdoonka qaranka iyo hey'adaha ammaanka lugta ku leh dedaalka kahortagga argagixisada inay ka fiirsadaan inay haystaan shaqaale ku filan oo haysta caddayn inay ammaan yihiin oo la hubiyo inay shaqaalahaasi helaan fasax haboon ay ku gaalaan qalabka maamuka xogaha iyo farsamda nidaamyada si ay u karikaraan inay dib u eegis haboon iyo qalabka loo baahanyahay.

12. **Haruumari** oo sare uqaad nidaamka warbaahineed oo la helikaro (gelikaro) oo u suurtogelinaaya xubnaha Booliiska inay si sahalan oo nabada uga warbixiyaan werwer dabeecado ama dhacdooyin una dirikaraan bar xidhiidheed keliya oo dawladda ah.

13. **Haruumari** oo daabac tilmaameyaal waxyaabo khatar ah oo umuujiya dadweynaha dabecado gaara oo soo bandhigikara awood qof inuu ku dhaqaaqikaro rebshado xagjira ama argagixiso si joogto ahna loo cusboonaysiin-karo markay hanjebaadu isbedeshaba.

14. **Dhis** barnaamij lagu maalgeliyo cilmibaadhis New Zealand u gaara ahna waxa sababa, iyo talaabooyin lagaga hortegaayo rebshadaha xagjirka ah iyo argagixisada qodobada soosocda:

    a) Sirdoonka Qaranka iyo Hey'adda Ammaanka (Talobixinta 2) waa in la siiyo maalgelin cilmibaadhiseed oo sannado badan loo qoondeeyay;

b) mudnaano cilmibaadhisa iyo deeq qaateyaal waa inay doortaan guddi ka kooban saraakiil ka socda sirdoonka qaranka iyo hey'adda ammaanka cusub (Talabixinta 2) qaar ka wakiila gudida talobixinta kahortegidda argagixisada (Talobixinta 7), iyadoo ay wakiilada Gudida Talobixinta noqonayaan inta badan ee gudida la doortay; iyo

c) deeq qaateyaasha waa in lagu dhiiriyo inay daabacaan kuna soo bandhigaan natiijooyinka cilmibaadhistooda sannadlaha hui arrimaha laxiriira xagjirnimada iyo kahortagga, ogaansha iyo ka jawaabidda hanjebaadaha socda iyo kuwa soobaxaya kana imanaya rebshadaha xagjirnimada iyo argagixisada (Talobixinta 16).

15. **Abuur fursado** si aad uharuumariso bulshadu waxay ka garanayso xagjirnimada iyo kahortagga, ogaanshaha, oo ka jawaabaya hanjebaadaha socda iyo kuwa soo baxaayaba ee ka wada rebshedaa xagjirnimada iyo argagixisada New Zealand, uu markii hore hogaaminaayay Wasiirka Ammaank Qaranka iyo Sirdoonka ay kamidyihiin wadahadallo uga socda Bulshada arrimahan:

a) dabeecadda New Zealand ee dedaalka kahortagga argagixisada, kana midyihiin halista socota iyo hanjebaadda iyo sida hey'adaha Bulshada uga ilaaliyaan reer New Zealand hanjebaadda iyo halista argagixisada;

b) yaa ku lugleh dedaalka kahortagga argagixisada iyo doorarkooda, aqoonsiga inay shucuubta, bulshada rayidka ah, dawladda hoose iyo qaybaha khaaska ahi dhammaantood qayb ayay ka yihiin dedaalka kahortagga argagixisada, ay ku jirto aasaanay ku koobnayn, in la keeno ilo isgaadhsiineed oo muhiim ah;

c) baahida in la taabto isu dheelitirka waxa uqaara shakhsiyadaha iyo ammaanka shakhsiyadaha iyo shucuubta iyo inla fahmo inay ummadu u ogolaatay hey'adaha Bulshadainay ka hawlgalaan kahortagga argagixisada iyo kana hortagaan dhaqdhaqaaqa rebshadaa xagjirnimada ah;

d) in laga taageero bulshada fahamka sida looga falceliyo marka la garto dabeecado werwer keenikara iyo dhacdooyin laga yaabo inay soo bandhigaan awoodda qofka inuu ku dhaqaaqikaro rebshad xagjirnimo iyo argagixiso; iyo

e) sida isku xidhnaashaha Bulshad, kamid noqosha Bulshada iyo kala duwanaansha inay waxtarto bulshada waxku oolka ah.

16. **Ku hag Madaxa** Fulinta sirdoonka qaranka iyo hey'adda ammaanka ee cusubi (Talobixinta 2) inay martigeiyaan hui, inay isu keenaan hey'adaha dawladaha dhexe iyo hoose ee iskuxidhan, shucuubta bulshada rayidka ah, qaybta khaaska ah iyo cilmibaadheyaasha (Talobixinta 14) si ay usameeyaan fursado lagu dhiso xidhiidho iyo inay wadaagaan fahamka kahortegidda rebshadaha xagjirka ah iyo argagixisada.

**17. Ubaahayahay** sharciahaan:

a) Wasiirka Ammaanka Qaranka iyo Sirdoonka inuu daabco markuu socdo wareeg baarlamaan kastaa Ammaanka Qaranka iyo Sirdoonka waxyaabaha mudnaantooda ah una soo jeediyaa Sirdoonka Baarlamaanka iyo Gudida Ammaanka si ay uga fiirsadaan;

b) wasiirka ka mas'uulka ahi waa inuu daabacaa sannad walba warbixinta hanjebaadaha oo dhan (Talobixinta 1); iyo

c) Sirdoonka Baarlamaanka iyo Gudida Ammaanka waa inay helaan oo ka fiirsadaan wixii looga soo gudbiyay Ammaanka Qaranka iyo Sirdoonka mudnaanihii ay keeneen iyo warbixintii hanjebaadii sannadka oo dhan.

**18. Dib haloo eego** xeerarka khuseeya dedaalka kahortagga argagixisada (kamidyihiin Xeerka Cadaadinta 2002 iyo Xeerka Sirdoonka iyo Ammaanka 2017) si loo hubiyo inuu dhaqangal yahay oo usuurto gelinaayo hey'adaha Bulshada inay ushaqeeyaan si waxku oola, mudnaanna la siinayo ka fiirsashada in la sameeyo hordhac dembiyada argagixisada oo ku jira Xeerka Cadaadinta Argagixisada, si degdeg ah dib loogu eego saamaynta qaybta 19naad ee Xeerka Sirdoonka iyo Ammaanka ku leeyahay helidda bartilmaameedka iyo in la ogolaado lana hirgeliyo Heshiiskii Budapest.

## Talobixinihii hagaajinta nidaamka liisan bixinta qoryaha New Zealand

**Waxaanu ku talinaynaa inay Dawladdu:**

19. **Ku hag** Booliiska New Zealand (ama hey'ad kale ay khusayso) in la sameeyo siyaasado iyo heerarka hawlgalka iyo hanuunin nidaamka bixinta liisamada qoryaha oo cad oo waafaqsan sharciga.

20. **Ku hag** Booliiska New Zealand (ama hey'ad kale ay khusayso) inay keenaan nidaam elektroonik ah oo lagaga shaqeeyo codsiyada liisamada qoryaha.

21. **Ku hag** Booliiska New Zealand (ama hey'ad kale ay khusayso) in la hubiyo inay shaqaalaha liisan bixinta qoryaha helaan tababar joogto ah oo lagu samaeeyo dib u eegis waqtiile ah oo lagu garto tayada shaqadooda.

22. **Ku hag** Booliiska New Zealand (ama hey'ad kale ay khusayso) inay keenaan tilmaameyaal waxqabad oo ku foogan hirgelin waxku oola ee nidaamka liisan bixinta qoryaha. Tilmaameyaasha muhiimka ah haka mid noqdaan:

    a) in joogto loo ilaaliyo waxqabadka shaqaalaha liisan bixinta qoryaha si loo hubiyo in heerarka qaranka la gaadhay; iyo

    b) in kor loo qaado kalsoonida dadweynaha ee nidaamka liisan bixinta qoryaha (sida u qiyaasan Booliiska New Zealand warbixintii sahankii raaligelinta wadaniga ama farsamo lamida).

23. **Ku hag** Booliiska New Zealand (ama hey'ad kale ay khusayso) waxa loo bahanyahay laba hawlood, xaaladda qofka arjiga soo qortay haduu ku noolaa debedda New Zealand muddo dheer tobankii sannadood ee ka horeeyay arjigiisa.

    a) dadka arjiga soo qortay waxa looga baahanyahay inay keenaan Booliis ama caddayn taariikh dembiyeedkooda ay ka keenaan dalalkii ay markii hore deganaayeen; iyo

    b) Saraakiisha Baadhista Qoryaha waa inay waraystaan xubno qoyskiisa ah ama cidkale oo ay leeyihiin xidhiidh dhaw oo jooga wadamada kale iyadoo la isticmaalayo technology-ga hadii aanu qofka  arjiga qortay ku lahayn ehel ama saaxiibo dhaw New Zealand.

24. **Soo bandhigidda** warbixin khasab ah marka dhaawac qori lagu geysto ayna usheegaan Booliiska xirfadleyaasha caafimaadku.

## Talobixinaha in la taageero kasoo kabashada baahiyaha socda ee qoysaskii saamayntu gaadhay, badbaadeyaashii iyo goobjoo-geyaashii

**Waxaanu kula talinaynaa Dawladda:**

25. **Ku hag** Wasiirka Haruumarinta Bulshada inuu la shaqeeyo Hey'adaha Qaybaha Bulshada ay khusayso ay kamid yihiin Booliiska New Zealand, Shirkadda Magdhawga Shilka, Wasaaradda Caddaaladda, Socdaalka New Zealand iyo ururada aan dawliga ahayn inay fududeeyaan hawlgal meelmar ah (coordinated access) oo uleh taageero soo kabasho socota qoysaska (whanau) saamayntu gaadhay, badbaadeyaasha ama goobjoogeyaashii weerarkii argagixisada ahaa 15kii March 2019kii, ay ku jiraan in loo qoondeeyo midkasta oo ah qoysaskii dhibtu gaadhay, badbaadeyaashii ama goobjoogeyaashii hal meel oo leh xiriir joogto ah oo ku haga dhammantood taageerada ay uga baahanyihiin qaybaha Bulshada ee iyaga u hadlaya.

26. **Baadh** in la abuuro Shebekadda Saamaynta Wadajirka iyo Guddi ama farsamo kale oo u suurogelisa Hey'adaha Bulshada, ururada aan dawliga ahayn iyo qoysaska saamayntu gaadhay, badbaadeyaasha iyo goobjoogeyaasha si laysugu afgarto mashruuc shaqo oo gaara siiyana adeeg waxwalba qabta oo joogto ah qoysaska dhibtu gaadhaay, badbaadeyaasha iyo goobjoogeyaasha.

27. **Ku Hag** Waaxda Ra'iisal Wasaaraha iyo Baarlamaanka oo ay la shaqaynayaan hey'adaha Bulshada ay khusaysaa inay kala hadlaan qoysaska dhibtu gaadhay, badbaadeyaasha iyo goobjoogeyaasha weerarkii argagixisada ahaa ee 15kii March 2019kii waamaxay, hadii ay jirto, hawsha cadaaladda ah ee sii jirikarta loona baahankaro iyo inta hawlood ee la habaynkaro lana maalgelinkaro.

## Talobixinihii lagu haruumarinaayay wada noolaanshaha bulshada iyo jawaabta New Zealand u hayso koboca kala duwanaashaha dadweynaha

**Waxaanu kula talinaynaa Dawladda:**

28. **Ku dhawaaq** inuu Wasiirka Haruumarita Bulshada iyo Shaqogelinta, iyo Wasaaradda Haruumarinta Bulshada hayaan mas'uuliyadda iyo laxisaabtanka iskuxidhka dhammaan habka dawladdu udhisayso wada noolaanshaha bulshada iyo kamidnoqoshada bulshada.

29. **Ku Hag** Wasaaradda Haruumarinta Bulshada inay kala hadlaan iskana kaashadaan shacabka, bulshada rayidka ah, dawladda hoose iyo qaybta khaaska ah haruumarinta qaab istaraatiji u ah wadanoolaanshaha bulshada iyo ilaalinta iyo qiimaynta nidaamka.

30. **Baadh** ururada fursadaha dawladda ay uhelayaan hey'ad ku foogan qomiyadaha bulshada iyo kala duwanaanshaha dhaqanka loona abuuro hab urureed ku haboon ujeedada loo sameeyay kuna kooban shaqooyinka socda ee laga filaayo Xafiiska Bulshada Qowmiyadaha kale oo loo suurto geliyo hey'adda Bulshada ka mas'uulka ah ee cusub si ay ugu foognaato ugana shaqeeyaan hawlaha soo socda:

    a) inay kala taliyaan dawladda iyo hey'adaha bulshada sida ay mudnaanta ukala siinayaan iyo caqabadaha saamaynaya samaha qowmiyadaha bulshada;

    b) iskudar isticmaalka falanqaynta xogta, ilaali oo qiimee dedaalka qaybaha Bulshada si loo haruumariyo samaha qowmiyadaha Bulshada, waxa uu noqonaayo dedaalkaasi iyo sida mudnaanta loo kala siinaayo; iyo

    c) haruumari oo qiimee qaab la jaanqaadaya tilmaamaha waxqabadka ee qiyaasa saamaynta iyo waxkuoolnimada siyaasadaha dawladda iyo mashruucyada loo dhisay samaha qowmiyadaha Bulshada.

31. **Mudnaan sii** haruumarinta talaabooyinka iyo tilmaameyaasha ku haboon (sida Qaabka Heerarka Nolosha) wadanoolaanshaha Bulshada iyo kaminoqoshada Bulshada.

32. **Ka dalbo** hey'adaha Bulsahada inay mudnaan kala siiyaan ururinta xogta tirada dadka qowmiyadaha iyo Diinaha si ay u taageerto falanqayn iyo talada saamaynta Bulshadu sida dhakhsaa ah isu bedelaysa ee New Zealand, ogeysii in la sameeyo siyaasad wacan oo kor loogu qaado qiimaynta siyaasadda.

33. **Ku hag** Madaxda Fulinaha hey'adaha qaybaha Bulshada ee ku lugleh dedaalka kahortagga argagixisada si ay usii wadaan ku foognaanta dedaalka ku saabsan kala duwanaanshaha shaqaalaha sida weyn u kordhaysa oo ay kamidyihiin doorka madaxda iyo latashiga Gudida Talobixinta ee kahortagga argagixisada (Talobixinta 7).

34. **Ku dhiiri** Madaxa Adeegga Bulshada inuu daabaco sannad walba warbixin taasoo::

a) inuu ka keeno aragti balaadhan haruusocodka qaybaha Bulshada ballanqaadyadii Papa Pounamu sida suuradinta meelaha ay hey'adaha Bulshada waxqabadkoodu fiicanyahay, meelaha lagu samaynkaro haruumar iyo in lagu sameeyo ufiirsasho muhiima hey'adaha oo dhan si loo jiheeyo dedaalkooda; iyo

b) in mudnaan la siiyo haruumarka ay sameeyeen hey'adaha Bulshada ee ku lugleh dedaaka kahortagga argagixisada.

35. **Ku dhiiri** Madaxa Adeegga Bulshada inuu sii wado dedaalka ku foognaanta kala duwanaanshaha shaqaalaha ee sida baahsan u kordhaaya uu soo jiito kartida kala duwan ee adeega Bulshada madaxdooda doorka heerka koowaad, ka labaad iyo ka saddexaad.

36. **Maalgeli** fursadaha dhalinyarada reer New Zealand si wax looga barto doorkooda, xuquuqdooda iyo mas'uuliyadahooda iyo qiimaha ay leedahay kala duwanaanshaha qowmiyadaha iyo diinta, wadanoolaanshaha, xalilaadda iskudhaca, aqoonta Bulshada iyo isxakamaynta.

37. **Abuur** fursado ay sijoogto ah ugu wada hadlaan Bulshadu kaasoo uu hogaaminayo wasiir mas'uulihi – Wasiirka Haruumarinta Bulshada iyo Shaqogelinta – si ay reer New Zealand oo dhammi u wadaagaan aqoon oo sare uqaadaan fahamkooda:

a) wadanoolaanshaha Bulshada, kamidnoqoshada Bulshada iyo dedaalka wadajirka ah ee loo baahanyahay si loo gaadho kuwan; iyo

b) qiimaha uu kala duwanaanshaha dhaqanka, qowmiyadda iyo diintu ku kordhinkaraan bulshada si fiican ushaqaynaysa.

38. **Dalbo** wax ka qabashada ummadda iyo dhammaan qaybaha Bulshadu inay waafaqaan New Zealand ay ka go'antahay Iskaashiga Dawladda Furani gaarahaan:

a) waxay ubaahantahay inay hey'aduhu cadeeyaan heerka saamaynta hawlgalka ummadda ku leeyahay in lagaadho go'aan laysku raacsanyahay iyagoo ummadda tusaya halka hawlgalku taaganyahay marka la eego Ururka Caalamiga ah ee Kaqaybgalka Bulshada IAP2 (*Public Participation Spectrum*) Kaqaybgalada Spectrumka Bulshada; iyo

b) dhiirigeli in la qaado wax badan "ku luglahaw" iyo "iskaashada" oo ah heerarka hawlgalka la xidhiidha Ururka Caalamiga ah ee Kaqaybgalka Bulshada IAP2 (International Association for Public Participation) Khadka Kaqaybgalka Bulshada (*Public Participation Spectrum*).

39. **Waxka Bedel Sharciga** si loo sameeyo dembiyada nacab dhiirigelitu ay kujiraan:

a) Soogaabinta Xeerka Dembiyada 1981 kaasoo udhigma dembiyada jira sida anshax xumo ama af xumo, dagaal, waxyeelo ulakac ah iyo baqdingelin; iyo

b) Xeerka Dembiyada 1961 oo udhigma dembiyada jira ee dagaalanka, wax gubidda (Arson) iyo dhaawaca caalamiga ah.

40. **Kanoqo qaybta** 131 ee Xeerka Xuquuda Adamaha 1993 oo geli qodob Xeerka Dembiyada 1961 marka dembi la galo kicinaya takoor ama diin nacayb, oo ku salaysan inuu kiciyo, ilaaliyo ama caadi kadhigo nacayb, adeegsanaya hanjebaad.

41. **Waxka bedel** qeexidda "la diidikaro (objectionable)" oo kujira qaybta 3 Xeerka filimada, Video-yada iyo Kala Sooca Daabacidda 1993 si loogu daro isir saraysiin, isir nacayb iyo dir sooc.

42. **Ku Hag** Booliiska New Zealand inay dib u eegis ku sameeyan hababkay u diiwaangeliyaan ashkatooyinka dabeecad dembiyeedka si nidaamahaan loo qabto dhiirgelinta nacaybka ee dembiyada lagu galo iyo tababar shaqaale oo ah:

a) in la suuradiyo tilmaameyaasha eexda si loo garto dembiyo nacayb oo dhicikara markay gartaan inuu dembigu yahay mid ujeedo nacayb lah;

b) in la ogaado aragtida dhibanaha iyo markhaatiyada si ay ugaadhaan meel ay ku diiwaangelinkaraan halka dembiga la gartay inuu yahay mid ujeedo nacayb leh; iyo

c) in la diiwaangeliyo dhiirigelinta nacaybka sidan ahi waxay fududaysaa in mardambe la adeegsado qaybta 9(1)(h) ee Xeerka Xukumidda 2002.

## Hirgelinta Talobixinaha

**Waxaanu kula talinaynaa Dawladda:**

**43. Hubi wasiirka** in la siiyo mas'uuliyado iyo in lala xisaabtamo si uu uhogaamiyo oo isku dubarido jawaabta iyo hirgelinta talobixintayada oo ballanta ku dhawaaqo:

**44. Inuu Dhiso** Kooxda Talobixinta Kormeerka Hirgelinta taasoo:

a) inay ku jiraan wakiillo ka socda shacabka, Bulshada rayidka ah, dawladda hoose, qaybaha khaaska ah, qoysaskii dhibtu gaadhay, badbaadeyaashii iyo goobjoogeyaashii iyo Gudida Tixraaca Bulshada Muslimka aynu leenahay;

b) inuu siiyo talo iyo wasiirada ka mas'uulka ah (Talobixinta 1 & 43) sida loo nakhshadeeyay qorshaha fulinta dawladda iyo siday u gaadhsiinayaan; iyo

c) inay daabacaan taladooda si kor loogu qaado daahfurnaanta.

# Dammaadka Qoraalka

1 Warbixintani waxay bixinaysaa aragati madax banan oo ah wixii dhacay uu horkacayay weerarkii argagixisada ahaa ee 15kii March 2019, hadayjireen, maxaa laga qabankarilahaa si loo joojiyo iyo maxay tahay in si fiican loo sameeyo si aynu u ilaalino reer New Zealand.

2 Waxa ka soo baxay dhacdadii foosha xumayd ee weerarkii argagixisada ahaa 15kii March 2019kii mas'uuliyad ah in loo eego oo wax laga barto.

3 Mas'uuliyadda kowaad ee dawladda waa ammaanka dadkeeda. Sikastaba ha ahaatee, ammaanka qaranka maaha mas'uuliyadda sirdoonka, ammaanka iyo hey'adaha dhaqangelinta sharciga oo keliya. Hey'ado qaybaha Bulshada oo badan ayaa sidoo kale door ay qaataan leh. Laakiin waxa muhiim ah inay doorkaasoo kale leeyihiin shucuubta, bulshada rayidka ah, dawladda hoose iyo qaybta khaaska ahi. Reer New Zealand waxay ka ciyaari karaan door muhiim ah kahortagga argagixisada iyo xagjirnimada. Si ay uqaataan doorkaa, reer New Zealand waa in la ogaysiiyaa arrimahan iyo waxay qabankaraan si ay caawimo ugeystaan.

4 Iyadoo tan maskaxda laguhayo, waxaanu warbixintayada ku darnay war aad u badan oo markii hore laga dhigay sir culus ama sir. Waxaanu sidaa uyeelay si aanu umuujino sida dedaalka kahortadda argagixisada New Zealand runtii ushaqeeyo. Tani waxay usuutro gelinaysaa doodda lagelidoono waqtiga soo socda inay sii ogaadaan war badan. Waxaanu uaragnaa dooddaa in lasii ogeysiiyaa inay utahay aasaaska ogolaanshaha bulshada iyo waxkuoolnimada dedaalka kahortadda argagixisada.

5 Waanu aqoonsanahay inaanu gabagabaynay falanqayntayadii iyo warbixintiiba iyadoo COVID-19 nahadheeyay. Cudurkan caalamiga ah (pandemic) ayaa saameeyay shucuubta oo dhan waxaanuu ahaa wax cad oo xasuusiya baahida loo qabo inay Bulshadu adkaysi iyo iskaabid yeelato. Waxay kaloo ahayd tilmaan cad halka la gaadhikaro marka bulshadu u wada dhammaato danta guud ee weyn darteed.

6 Waxa aasaas u ah New Zealand wanaagga mustaqbalkeeda iyo ammaankeeda waa wada noolaanshaha Bulshada. Iyadoo wada noolaansha bulshada New Zealand ka sarreeyo wadamo kale oo badan, waxaa jira khadad cilladaysan. Kudhaqanka iyo kor u qaadidda wada noolaanshuhu waa shaqo muhiim ah oo utaal dawladda. Waanu ku kalsoonahay inay jirto doonistii. Waxaanu keenay farsammooyin ku jiray talobixinahayagii si ay u rumawdo doonistaasi.

7 Isbedeladani ma sahlanaan doonaan, laakii waxaanu gogolay wero markaa waxaanu ku boorinaynaa dawladda inay qaadato loolankaa oo wax qabato.